SAN DIEGO UNIFIED SCHOOL DISTRICT
XAFIISKA KU- XIGEENKA MADAXA WAXBARASHADDA
Waaxda Barnaamijyada Waxbarashadda Khaaska ah
Eugene Brucker Education Center
4100 Normal Street Annex 6 San Diego, CA 92103 (619) 725-7600

OGEYSIIN KU SAABSAN XUQUUQDA WAXBARASHADDA

TUSMADA

BOGGA

HORDHAC……..2

OGEYSIIS, OGGOLAANSHO, BAADHITAAN, KA QEYBGAL IYO MARINKA…….2

Bilowga Ogeysiiska Qoraalka ah……2
Xuquuqda aad u leedahay inaad Hesho ogeysiin ku saabsan Xuquuqda Waxbarashadda……..2
Oggolaanshaha Waalidka……3
Waalid-u-yaal (Surrogate Parents)……..3
Ilmaha 18 jirka ah ama ka weyn…….3
Ka qeybgalka Waalidka……..4
Baadhitaanka……4
Baadhitaanka Midab-kala-sooc la'aanta ah……4
Qorshaha Baadhitaanka……4
Baadhitaanka Waxbarashadda ee Madaxa Bannaan……4
Helitaanka Diiwaanada Waxbarashadda……..4

SIYAABAHA KHILAAFKA LOO XALLIYO…….6

Nidaamka Xuquuqda Dhawrsan……..6
Dhexdhexaadinta……6
Dhageysiga dacwadaha nidaamka xuquuq dhawrsan……6
Gudbinta qoraal ku saabsan Cabashada nidaamka xuquuq dhawrsa……...7
Lacagta Qareenka……8
Dib-u-eegista lagu sameynaya Nidaamka Xuquuqda Dhawrsan ee Meeleynta Ilmaha ee aan weli Go'aan laga gaadhin……8
AKHLAAQDA DUGSIGA IYO NIDAAMYADA MEELEYNTA ARDEYDA BAAHIDA KHAASKA AH LEH……..8

Goob Kale oo Waxbarasho ah Si-ku-meel gaadh ah ugu Meeleyn……...9
CARRUURTA DHIGTA DUGSIYADA GAARKA AH……. 9

Ku Meeleynta ay Waalidku ilmaha ku Meeleeyaan Dugsiga Gaarka ah……...9
Ilmahaaga dhigta Dugsiga Gaarka ah Fiiro dheer u yeelasho……..9
Marka lacagta dugsiga la siiyo la dhimayo ama la diidayo……...9
Ogeysiinta Waxbarashadda Degmada……10

WARBIXIN DHEERAAD AH…….....11

OGEYSIIN KU SAABSAN XUQUUQDA WAXBARASHADDA

HORDHAC

Kanu waa Ogeysiiska ku saabsan Xuquuqda Waxbarashadda ee uu dhigeyo Qoddobka Sharciga Waxbarshadda ee Sannadkii 2004 (IDEA). Ogeysiiskan waxaa kale oo la siiyey ardeyda xaq u leh ee da'doodu tahay 18. Warbixintanu waxay waalidiinta, dadka ilmaha sida sharciga ah masuulka uga ah, iyo dadka ilmaha koriya ee leh carruur naafada ah oo da'doodu ay u dhexeyso 3 sanno ilaa iyo 21 jirka kaa siineysa guudmar ku saabsan xuquuqdooda waxbarasho oo mararka qaarkood loo yeqaano ilaalinta nidaamka. Marka dikoomentigan la qorayey erayga ah "waxbarashadda degmada" waxaa loo adeegsadey inay tahay ha'ayada kasta oo guud oo masuul ka ah inay ilmahaaga u fidiso barnaamijka waxbarashadda khaaska ah. Erayga "qiimeyna" waxaa macnahiisu yahay oo loo adeegsadey baadhitaan.

IDEA waa sharci ka jira dawlada-dhexe oo fareya inay waxbarashadda degmooyinku siiyaan waxbarashadda guud ee lacag la'aanta ah ("FAPE") ay carruurta baahida khaaska leh ama naafo ah u baahan yihiin, waana kuwa xaq u leh. FAPE macanaheedu waxaa weeyaan waxbarashadda khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha ee lagu qeexay barnaamijka waxbarashadda shakhsiyeed ee loo yeqaano ("IEP"), taas oo ay dadweynuhu kormeer ku sameynayaan, ilmahaagana lacag la'aan lagu siineyo.

Marka ay dhacdo inaad walbahaar ka muujiso waxbarashadda ilmahaaga, waxaa aad iyo aad muhim u ah inaad wacdid ama aad la xidhiidhid macallinka ilmahaaga ama maamulka oo aad la socodsiisid waxyaabaha dhibaatooyinka ah ee aad ku aragatay ilmaha. Shaqaalaha dugsiga ama shaqaalaha waxbarashadda degmada ee qaabilsan waxbarashadda khaaska ah ("SELPA") ayaa kaaga jawaabi kara su'aalaha waxbarashadda ilmahaaga la xidhiidha, xuquuqdaada iyo xuquuqdaada waxbarasho. Marka aad wax ka walbahaarsan tahay, inta badan wada hadalka aan rasmiga ah ayaa dhibaatada xalliya, wuxuuna albaabada u furaa xidhiidh wanaagsan in la yeesho. Macluumaadka aad u baahan tahay si aad si wanaagsan ugu fahantid xuquuqdaada waxbarasho waxay liiskoodu ku taxan yahay dikoomentigan xaggiisa ugu dambeysa.

OGEYSIIS, OGGOLAANSHO, BAADHITAANKA, KA QEYBGAL IYO MARINKA

<u>Bilowga Ogeysiiska Qoraalka ah</u>

Inta aan la meel marin go'aanka ku saabsan in ilmahaaga lagu qoro barnaamijka waxbarashadda khaaska ah, waxaad xaq u leedahay inaad waxbarashadda degmada ka heshid ogeysiin qoraal ah oo arrintaas ku saabsan. Waxbarashadda degmadu waa inay waAlidiinta ku wargelisaa ogeysiin qoraal ah oo la fahmi karo, kaas oo ku qoran luuqada ay ku hadlaan ama isgaadhsiin nooc kale ah ilaa ay noqoto wax aan la sameyn karin mooyee.

Ogeysiiskan waa in lagu siiyaa marka ay waxbarashadda degmadu soo jeediso ama diido:

- Ay ogaadaan in ilmahaagu naafo yahay, ama naafonimadu ilmahaaga nooca uu yahay intay ka beddelaan mid kale u beddelaan;
- Ay heli karaan baahida khaaska ah ee waxbarasho ee uu ilmahaagu qabo;
- In la baadho ama hadana dib loo baadho ilmahaaga;
- In ilmahaaga lagu meeleeyo barnaamijka waxbarashadda khaaska ah;
- La Beddelo meeleynta waxbarashadda khaaska ee ee ilmahaaga; ama
- Ilmahaaga u fidi FAPE, ama wax ka beddelka FAPE ilmahaaga

Bilowga ogeysiiska qoraalka ah waa inay ku jiraan waxyaabahn soo socda:

- Sharaxaad ku saabsan talaabooyinka ay waxbarashadda degmadu soo jeedisay ama la diiday;
- Sharaxaad ku saabsan sababa talaabooyinkaas loo soo jeediyey ama loo diiday;
- Sharaxaad ku saabsan talaabooyinka kale ee ikhtiyaariyada ah ee la soo jeediyey iyo sababhii waxyaabahaas ikhtiyaariyada loo diiday;
- Sharaxaad ku saabsan nidaamka baadhitaan kasta, imtixaanka, diiwaanka ama warbixnta saldhiga looga dhigay talaabooyinkan la soo jeediye ama la diiday; iyo
- Bayaan ku saabsan in waalidiinta haysata ilmaha naafada ah inuu ilaalineyo xuquuqdaada waxbarasho ee dejisan.

Haddiin ogeysiisku uusan ku saabsan gudbinta bilowga ah si loo baadho, waa in bayaanka ama qoraalku uu bixiyaa ilaalin sida uu dhigeyo xuquuqdaada waxbarasho, warbixinta ku saabsan siyaabaha aad ku helaysid nuqulka nidaamka ilaalinta oo sharaxan; iyo warbixinada dheeraadka ah ee kaa caawineya in aad fahantid xuquuqdaada waxbarasho.

Xuquuqda aad u leedahay inaad Hesho ogeysiin ku saabsan xuquuqda waxbarashadda
Nuqul ka mid ah Ogeysiiska ku saabsan xuquuqdada waxbarashadda waa in lagu siiyaa:

- Sannad kasta hal mar
- Marka koowaad ee lagu gudbiyo ama aad codsatid in baadhitaan lagu sameeyo
- Marka koowaad ee aad Dawlad-goboleedka cabasho sannad-dugsiyeedkaas ka heshid
- Marka koowaad ee nidaamka xuquuq dhawrsan cabashada sannad-dugsiyeedkaas aad heshid
- Marka ay waxbarashadda degmadu go'aan ku gaadho in ilmahaaga meeleynta laga beddelo sababtoo ah wuxuu jebiyey nidaamka akhlaaqdii ardeyga looga baahnaa
- Mar kasta oo aad nuqul codsatid

Oggolaanshaha Waalidka
Waxbarashadda degmadu inta aysan qaadin talaabooyin la xidhiidha baahida waxbarashada khaaska ah ee ilmaha waa inay waalidiinta wargeliyaan qoraalna u gudbiyaan. Warqad qoraal ah oo ay waalidiintu soo qoraan ayaa loo baahan yahay:

- Baadhitaanka Koowaad: Waxbarashadda degmadu waa inay ku wargelisaa, isla mar ahaantaasna, qoraal oggolaansho ah kaa haysataa inta aysan ilmahaaga baadhitaan ku sameynin.Waxaa lagula socodsiin doonaa noocyada baadhitaanada ah ee ilmahaaga lagu sameynayo.
- Dib-u-baadhis: Waxbarashadda degmadu waa inay ku wargelisaa, isla mar ahaantaasna, qoraal oggolaansho ah kaa haysataa inta aysan ilmahaaga dib-u-baadhis ku sameynin. Waxbarashadda degmadu waxay dib-u-baadhis ku sameynayan ilmahaaga iyaga oo aan qoraal oggolaansho ah kaa helin, taasina waxay dhacaysaa marka talaaboyinkii loo baahnaa ay waxbarashadda degmadu qaado oo aad ka soo jawaabi weydo xidhiidhka ay kula soo sameeyeen. Si arrintaas khaladkeeda looga hortego, waa inaad waxbarashadda degmada qoraal kula socodsiisaa in aadan oggoleyn in ilmahaaga dib-u-baadhitaan lagu sameeyo.
- Meeleynta bilowga ah ama la sii wado ee waxbarashadda khaaska ah: Waxbarashadda degmadu waa inay ku wargelisaa, isla mar ahaantaasna, qoraal oggolaansho ah kaa haysataa inta aysan ilmahaaga ku meeleyn barnaamijka waxbarashadda khaaska ah ama isbeddel ku sameynin meeleyntiisa ama inay meel kale ku qorto.

Ilmahaaga in baadhitaan, dib-u-baadhitaan ama waxbarashadda khaaska ah lagu meeleeyo waad diidi kartaa. Waxbarashadda degmadu waxay raadisan kartaa sidii ay baadhitaan, dib-u-baadhitaan ama sii wadis ama beddelid meeleynta ilmahaaga iyada oo mareysa dacwada nidaamka xuquuqda dhawrsan ee aan dhan raacsaneyn, haddii ay u aragto inay faa'iido u leedahay waxbarahadda ilmaha. Marka koowaad adiga iyo waxbarashadda degmadu waa inaad isku daydaan dhexdhexaadin si aad khilaafkaas u xalisaan.

Foomamka oggolaanshuhu waa inay qeexayaan talaabooyinka la qaaday ee ku saabsan oggolaanshahaas la bixiyey, kedibna la qoraa liiska (hadday jirto) loo baahan yahay in cid kale loo gudbineyo iyo cida loo gudbineyaba. Mar kasta oggolaanshaha aad bixiso waad burin ama baabi'in kartaa, isla mar ahaantaasna, burintaasu maaha mid wax horey u dhacay oo dib loo soo celineyo, taas macnaheedu waxaa weeyaan in aadan inkirin ama diidin oggolaanshihii aad horey u bixisay, ka hor inta aadan burin ama baabi'in.

Waalid-u-yaal
Waxbarashadda degmadu waa inay hubsataa in shakhsiga loo doortey inuu ilmaha naafada ah ee aan waalidiin meelna lagu ogeyn koriyo. Waalidka ilmaha korineya waa in uusan noqonin qof shaqaalaha waxbarashadda degmada ka tirsan, ama ha'ayadaha kale ee waxbarashadda ilmaha la xidhiidha ama ilmaha xanaaneeya. Waalidka ilmaha uusan dhalin korineya waa la dooran karaa, haddii ilmuhu uu yahay mid ku tiirsan dambiile sida sharciga dawlad-goboleedka ee Sharciga Badbaadada uu dhigeyo ama ilmaha loo gudbiyey barnaamijka waxbarashadda khaaska ah ama u horey IEP ugu jirey.

Ilmaha 18 jirka ah ama ka weyn
Ilmahaagu marka uu gaadho 18 jir, waxaa dhammaan xuquuqda ku xusan Qeybta B iyo IDEA loo gudbin doonaa ilmaha. Arrintaas taas ka reebi karta waxaa weeyaan oo keliya marka sharciga dawlad-goboleeku ay u arkaan inuusan aahayn mid iskiis wax u qabsan kara.

Ka Qeybgalka Waalidka

Waxaad xaq u leedahay in ilmahaaga loo gudbiyo adeegyada waxbarashadda khaaska ah si uu u helo. Waxaad xaq u leedahay inaad ka qeyb gasho shirarka ilmahaaga go'aamada looga gaadheyo, taas oo ay ku jirto aysan ku ekeyna, shirarka IEP ee ku saabsan xaq u lahaanshaha , baadhitaanka, iyo meeleynta waxbarashadda ilmaha iyo arrimaha kale ee la xidhiidha FAPE ilmaha.

Waxaad kale oo aad xaq u leedahay inaad ka qeyb gasho sida ay IEP u socota, iyo in lagu wargeliyo sida FAPE loo helayo, taas oo ay ku jirto dhammaan barnaamijyada ikhtiyaariyada ah, iyo dhammaan barnaamijyada kale ee la heli karo dugsiyada guud iyo kuwa dugsiyada guud aan ahayn labadaba.

Waxaad xaq u leedahay inaad shirarka IEP teeb rikoodh ku duubatid, hase ahaatee waa inaad shaqaalaha la socodsiisaa 24 ka hor inta uusan shirku dhicin inaad shirka duuban doontid.

Baadhitaanka

Baadhitaanka aan midab-kala-sooca lahayn

Waad xaq u leedahay in ilmahaaga laga baadho dhammaan meelaha laga shakisyan yahay inuu ku liito ama naafo yahay. Qalabka iyo nidaamyada lagu baadheyo ilmaha waa in aysan ahayn kuwo dhaqan ahaan, caado ahaan, ama jinsi ahaan la qoonsan karo. Qalabka baadhitaanka lagu sameynayo waa in la helaa, imtixaankana waa in luuqada uu ilmuhu si wacan u fahmayo looga qaadaa ama siyaabo kale oo lagu xidhiidho, ilaa ay macquul noqon weydo in waxyaabahaas la sameeyo. Hal nidaam ama ammuur oo keliya ilmaha xaq u lahaanshahiisa ama barnaamijyada waxbarasho ee ku habboon go'aan loogama gaadhi karo.

Qorshaha Baadhitaanka

Marka ay waxbarashadda degmadu ilmahaaga ku sameynayso waxaa lagu siin doonaa qorshaha baadhitaanka ee la soo jeediyey ama la sameynayo oo qoraal ah. Qorshahaas la sameynayo waxaa weheliya oo lagu siin doonaa nuqul ka mid ah dikoomentiga xuquuqda waxbarashadda . Marka baadhitaanka la dhammeeyo, waxaa kulmi doona kooxda IEP oo ka kooban waalidiinta ama dadaka ilmaha masuulka ka ah, iyo wakiiladaada, waxayna go'aan ka gaadhi doonaan in ilmuhu xaq u leeyahay in la siiyo adeegyada waxbarashada khaaska ah iyo in kale. Kooxda IEP ayaa ka wada hadli doonta baadhitaanka, kedibna talooyin waxbarashada ku saabsan soo jeedin doona iyo weliba sababa ay talooyinkaas u soo jeediyeen ayey sheegi doonaan. Nuqul ku saabsan warbixinada baadhitaankaas iyo dikoomentiyada xaq u lahaanshaha ayaa lagu siin doonaa.

Baadhitaanka Waxbarashadda ee Madaxa bannaan

Haddii aadan ku qanacsanayn natiijada ka soo baxday baadhitaankaas ay waxbarashadda degmadu sameysay, waxaad xaq u leedahay inaad weydiisato inaad heshid in cid kale oo baadhitaanada waxbarashada u madax bannaan aqoon dheeraad ahna u leh ay ilmahaaga baadhitaan ku sameeyaan, taas oo lacagta dawlada lagu kharash gareynayo.Waxbarashadda degmadu waa inay ku siisaa macluumaad ku saabsan meelaha aad ka heli kartid baadhitaanka waxbarashadda ee madaxa bannaan iyo siyaabaha aad u codsan kartidba. Haddii ay waxbarashadda degmadu diido in loo baahan yahay in la sameeyo baadhitaanka waxbarasho ee madaxa bannaan, waa inay waxbarashadda degmadu codsataa Dhageysiga dacwada ee nidaamka xuquuqda dhawrsan si ay u caddeyso baadhitaanka ay sameysay inuu ahaa midkii habboonaa oo sax ah. Haddii ay waxbarashadda degmadu ku guuleysato weli waxaad xaq u leedahay in baadhitaan madax bannaan la sameeyo, laakiin lacagta dawlada laguma kharash garenayo ama bixineyo in baadhitaankan la sameeyo. Kooxda IEP waa inay tixgeliyaan baadhitaanka madaxa bannaan.

Waxbarashadda degmadu waxay oggoshahay nidaamka baadhitaanka ilmaha ee fasalka-dhexdiisa fiiro dheer loogu yeelanayo. Haddii ay waxbarashadda degmadu ilmaha fasalka dhexdiisa fiiro dheer ugu yeelato, marka ay baadhitaanka sameynayso, ama ay waxbarashadda degmadu oggolaato in ilmaha fasalka dhexdiisa fiiro dheer loogu yeesho, waa in shakhsiyaadka sameynaya baadhitaanka madaxa bannaan ee waxbarashadda loo oggolaadaa inay fasalka dhexdiisa ilmaha fiiro dheer ugu yeeshaan.

Haddii waxbarashadda degmadu ay soo jeediso goob dugsi cusub ah in ilmaha la geeyo, isla markaasna, baadhitaanka waxbarshadda ee madaxa bannaan la sameeyo, waa in qofka baadhitaanka madaxa bannaan sameynaya loo oggolaadaa inuu marka ugu horreysa fiiro dheer ugu yeesho ama indha indheeyo goobtaas cusub ee ilmaha la geeyey.

Helitaanka Diiwaanada Waxbarashadda

Waxaad xaq u leedahay inaad baadhitaan ku sameysid oo aad fiirsid diiwanada waxbarashadda ee ilmahaaga ee ku saabsan aqoonsiga, baadhitaanka iyo meeleynta waxbarasho ee lagu sameeyey ilmahaaga ama xaalada FAPE ee

ilmahaaga, iyo in sharaxaad lagaaga bixiyo diiwaanadaas waxyaabaha ku qoran inta aadan shir kasta oo IEP ilmahaaga ka qeyb gelin ka hor ama Dhageysiga dacwada nidaamka xuquuq dhawrsan. Waxbarashadda degmadu waa inay ku siiso diiwaanada ilmahaaga ee aad u baahan tahay iyaga oo aan kaa soo daahinin, iyo xaataa haddaad nuqul codsato waa in lagu siiyaa, 5 maalmood gudahood marka aad heshid codsiga oo qoraal ama hadal ahaan laguugu soo gudbiyey, iyo ka hor inta aan shir kasta oo IEP ee ilmaha aan la qabanin ama dhageysiga dacwadaha kasta oo nidaamka xuquuq dhawrsan ah. Waxbarashadda degmadu kuma weydiin karto lacag ka badan midka diiwaanka waxbarashadda laguugu soo sawiray, laakiin haddii lacagtaasu ay waalidiinta wixii ay xuquuqda u lahaayeen ka qaadeyso, wuxuu waalidku xaq u leeyahay in diiwaanada waxbarashadda lacag la'aan lagu siiyo. Xuquuqdaas waxaa loo wareejin karaa ardeyda aan la gacanta lagu haynin ee siddeed iyo taban jirka ka weyn ama machadyada waxbarashadda dugsiga sare kedib ah ku jira.

"Diiwaanka Waxbarashadda" macnahiisu waxaa weeyaan diiwaanada sida tooska ah ula xidhiidha ardeyda oo ay gacanta ku hayaan ha'yadaha waxbarashadda ama cida kale ee meteleysa ha'yadaha waxbarashadda iyo machadyada, waxaana ku jira (1) magaca ardeyda, waalidka ilmaha ama xubnaha kale ee qoyska; (2) ciwaanka ardeygu deggan yahay; (3) aqoonsiga shakhsiyeed sida nambarka daryeelka bulshada ee ilmaha (social security number), nambarka ardeyga, ama nambarka faaylka maxkamada; (4) liiska astaamaha gaarka ah ee ilmaha iyo warbixinada kale ee lagu xaqiiqsaneyo inuu ilmuhu isagii yahay. Dawlada-dhexe iyo dawlad-goboleedku waxay labaduba diiwaanka ardeyga ku qeexayaan inuu yahay midka ardeyga warbixintiisa sida tooska ah loogu aqoonsaneyo, ee aan ahayn ka diiwaanka liiska telefoonada dadweynaha, kaas oo ay waxbarashadda degmadu xafideyso ama qof ka mid ahshaqaaluhu uu xafideyo si shaqooyinkiisa uu u guto, kaas oo lagu xafideyo qoraal gacanta lagu qorey, qoraal la daabacay, cajalad, filim, koombiyuutar iyo wixii la mid ah lagu hayo. Diiwaanada ardeyda kuma jiraan waxyaabaha ay ka mid yihiin waxyaabaha qofka shaqaalaha ah uu ardeyga ka qoro oo uu qofka shaqaalaha ah ku haysto faylkiisa, si uu isagu u isticmaalo ama qofka beddelkiisa ah uu u isticmaalo. Haddii diiwaanka ay ku jiraan warbixinada hal ardey in ka badan, waalidku wuxuu awood u leeyahay inuu helo qeybta ilmihiisa la xidhiidha oo keliya.

Diiwaanada ardeyda waxaa lagu xafideyaa dugsiga uu ilmuhu dhigto ama waxbarashadda degmada, laakiin qoraalka codsiga ah ee diiwaanada labadaas goobood mid uun yaala waxaa loo qaadaneyaa in diiwaankaas goobaha oo dhan laga codsadey. Qofka ilaaliyaha diiwaanada ardeyda ee waxbarashadda degmada wuxuu ku siineyaa liiska noocyada iyo meelaha ay diiwaanadu yaalaan (haddii la soo codsado). Qofka ilaaliya diiwaanada ardeyda waa inuu helitaanka diiwaanadaas u oggolaadaa oo keliya dadka la oggol yahay inay fiiriyaan oo keliya. Dadkaas loo oggol yahay waxaa ka mid ah waalidiinta ardeyda, ardeyga da'diisu ay ugu yaraan tahay lix iyo toban sanno, shakhsiyaadka ay waalidiintu fasax u siiyeen inuu diiwaanka ilmaha fiirin karo, shaqaalaha dugsiga ee sharciyan u xiiseynaya inuu diiwaanka ardeyga arko, machadyada waxbarasho ee dugsiga sare ka dambeeya ee uu ardeygu galayo, iyo shaqaalaha ha'yadaha waxbarashadda ee dawlada-dhexe, dawlad-goboleedka iyo tan deegaanka. Dadka aan fasaxa loo siinin inay diiwaanada ardeyda arkaan waa loo diideyaa, ilaa ay waalidiintu waraaq qoraal ah oo ay ugu oggolaaneyaan soo gudbiyaan ama diiwaanadaas waxaa lagu oggolaan karaa in la bixiyo marka ay maxkamadi soo xukunto. Waxbarashadda degmadu waa inay qoraal ahaan ku haysaa wakhtiga, magaca qofka iyo ujeeddada loogu oggolaadey shakhsiyaadka aan shaqaalaha waxbarashadda degmada ka mid ahayn.

Waalidiinta aaminsan in warbixinada diiwaanada ardeyda ee ay waxbarashadda degmadu hayso ama isticmaashey (marka waxyaabaha kale laga reebo) inaysan sax ahayn, marin habaabineysa wixii jirey ama waxyeelo u geysaneysa xuquuqda ardeyda waxay qoraal ahaan waxbarashadda degmada kaga codsan karaan inay warbixintaas saxaan. Haddii ay waxbarashadda degmadu arrintaas waalidka ku waafaqdo, diiwaanka waa la sixi doonaa, waalidkana waa la soo ogeysiin doonaa. Haddii ay waxbarashadda degmadu diido inay saxdo codsiga loo soo jeediyey, waa inay waxbarashada degmadu la socodsiisaa waalidka inuu dacwad arrintaas ka furo, haddii loo baahdo, si loo ogaado in warbixintaasu aysan sax ahayn, marin habaabineysa wixii jirey ama waxyeelo u geysaneysa xuquuqda ardeyda. Guddiga maamulku marka uu dacwada dhageysto kedib haddii uu go'aansado inaan diiwaankaas la sixi doonin, waalidku wuxuu xaq u leeyahay inuu qoraalka uu aaminsan yahay inuu sax yahay diiwaankaas lagu lifaaqaa. Waalidiinta rabta ee codsaneysa in diiwanada la baabi'iyo, kuwaas oo aan wax muhimada ah u lahayan waxbarashadda degmada, waxay la xidhiidhi karaan Ilaaliyaha Diiwaanada ee waxbarashadda degmada. Hase ahaatee, waxbarashadda degmada waxaa looga baahan yahay in ay warbixinada qaar ka mid ah xafido oo hayntooda sii daba dheereeyo.

SIYAABAHA KHILAAFKA LAGU XALLIYO

Nidaamka Xuquuqda Dhawrsan

Waxaad xaq u leedahay in:

- Aad hesho dhageysiga dacwadaha oo cadaalad ah aysan eex ku jirin oo heer dawlad-goboleed ah, inta uusan qofku aqoon u lahayn sharciyada lagu maamulo waxbarashadda khaaska ah iyo dhageysiyada dacwadaha.
- Uu kula socdo, kulana taliyo qareen ama shakhsi aqoon u leh carruurta naafada ah.
- Aad keentaa caddeyn, dood qoraal ah , iyo dood afeedba.
- Aad hortegtid, su'aalo weydiin lagu hubineyo in qof run sheegayo iyo in kale, siiba qof markhaati ah, waxaana loo baahan yahay inuu qofka markhaatiga ah goobjoog ahaado.
- Aad heshaa iyada oo qoraal ah, ama ikhtiyaarka waalidka, iyada oo cajalada ku duuban, taas oo ay ku jirto sida xaqiiqooyinka lagu helay, iyo go'aamada oo waalidka lagu siiyo si lacag la'aan ah.
- Uu ilmahaagu joogaa Dhageysiga dacwada.
- Aad Dhageysiga dacwada ka dhigtid mid dadweynaha u furan ama dadweynaha ka xidhan.
- Ay cida kale ee ay dacwadu idin ka dhexeyso kula socodsiiyaan waxyaabaha ay dhibaatadu tahay iyo sida ay u arkaan in lagu xallin karo ugu yaraan toban maalmaha la shaqeeyo ah ka hor.
- Lagu siiyo nuqul ah dhammaan dikoomentiyada ay ku jiraan baadhitaanka taariikhdaas la dhammeeyey iyo talooyinka la soo jeediyey, liiska dadka markhaatiga ah iyo arrimaha ay ka marrag-kaceen Dhageysiga dacwada ugu yaraan shan (5) maalmaha la shaqeeyo ah ka hor. Waxaad xaq u leedahay inaad diido in maxkamada la hor keeno caddeyn kasta oo aan lagugu wargelinin Dhageysiga dacwada ugu yaraan shan (5) maalmaha la shaqeeyo ah ka hor.
- Aad heshaa turjubaan ay Waaxda Waxbarashadda ee California kharashkiisa bixineyso.
- Aad codsatid in wakhtiga Dhageysiga dacwada laguu dheereeyo.
- Aad codsatid shir dhexdhexaadin ah mar kasta oo ay dhagesiga dacwada ee nidaamka xuquuqda dhawrsan ay socoto.
- Aad ka heshid qoraal ogeysiin ah cida kale ee ay dacwadu idin ka dhexeyso ugu yaraan toban maalmood ka hor dhageysiga dacwada, taas oo uu qareen goobjoog ka yahay.

Dhexdhexaadinta

Mar kasta oo lagu jiro dhageysiga dacwada waxaad waxbarashadda degmada ka codsan kartaa in khilaafka lagu xalliyo si dhexdhexaadin ah ama nidaam kale oo khilaafka lagu xalliyo (ADR), kaas oo yareynaya in cadaawad la isu qaado, halkan dhageysiga dacwada ee nidaamka xuquuqda dhawrsan ay sii socon lahayd. Nidaam kale oo khilaafka lagu xalliyo (ADR) iyo dhexdhexaadinta waa hab ikhtiyaariyo ah oo khilaafka lagu xalliyo, taasna looma isticmaali karo in lagu diido ama lagu daahiyo xuquuqda aad u leedahay dhageysiga dacwada ee nidaamka xuquuqda dhawrsan. Dhexdhexaadiyuhu waa qof dhexdhexaad ah oo aqoon wanaagsan u leh sharciyada iyo nidaamka la xidhiidha waxbarashadda khaaska ah, isla mar ahaantaasna, u tababaran tabaha dadka lagu caawiyo si dhibaatooyinka heshiis looga gaadho. Haddii nidaamkaas dhexdhexaadinta heshiis lagu gaadho waxay waalidiinta iyo waxbarashadda degmadu si wadajir ah u wada saxiixayaan qoraal heshiiskaas ah oo sharciga waafaqsan, taas oo manuuc ka dhigeysa in warbixinada dhedhexaadintaas la xidhiidha la soo saaro, ama la baahiyo iyo in laga hor istaago in loo adeegsado dhageysiga dacwada ee nidaamka xuquuqda dhawrsan oo mar dambe dhacda iyo dhageysiga maxkamada madaniga ah. Haddii shirkaas dhexdhexaadinta ah go'aan lagu gaadhi waayo, waxaad adiga iyo waxbarashadda degmaduba codsan kartaan in khilaafkaas lagu xalliyo dhageysiga dacwada ee nidaamka xuquuqda dhawrsan.

Dhageysiga Dacwada ee Nidaamka Xuquuqda Dhawrsan

Waxaad xaq u leedahay inaad codsatid dhageysiga dacwada ee nidaamka xuquuqda dhawrsan oo daacad ah kuna saabsan:

- In ilmahaaga loo oggolaado inuu xaq u leeyahay waxbarashadda khaaska ah;
- In ilmahaaga baadhitaan lagu sameeyo;
- In ilmahaaga waxbarashadda lagu meeleeyo; ama
- In ilmahaagu helo FAPE.

Codsiga dhageysiga dacwada ee nidaamka xuquuqda dhawrsan waa inaad xareysaa saddex sanno gudahood (ama laba sanno gudahood, bisha Oktoobar 9, 2006 kedib) laga soo bilaabo taariikhda aad ogaatey, ama aad u heshay sabab aad ku ogaatey, ee xaqiiqooyinka saldhiga u ah codsiga dhageysiga dacwada. Haddii ay waxbarashadda degmadu ka been sheegtay inay khilaafka xallisay, ama ay waxbarashadda degmadu xanibtay warbixino ay ahayd inay kuu soo gudbiso, oo ay arrintaasu sabab u noqotey inaadan soo codsanin dhageysiga dacwada ee nidaamka xuquuqda dhawrsan, wakhtiga waa laguu dheereynayaa.

Gudbinta qoraal ku saabsan Cabashada nidaamka xuquuqda dhawrsan
Adiga iyo qofka ku meteleya waxaa la idiin ka baahan yahay inaad gudbisaan qoraal codsi ah oo ku saabsan dhageysiga dacwada ee nidaamka xuquuqda dhawrsan, waxaadna soo gudbineysaan warbixinada soo socda: magca ilmaha, ciwaanka ilmuhu deggan yahay; magaca dugsiga uu ilmuhu dhigto; iyo sharaxaad ku saabsan nooca ay dhibaatadu tahay, taas oo ay ku jirto xaqiiqooyinka la xidhiidha dhibaatada iyo talooyinka la soo jeediyey in lagu xalliyo. Foomamka lagu gudbineyo waxaad kala soo bixi kartaa shabakada waxbarashadda degmada ee ah www.sandi.net ; kedibna waxaad gujisaa meesha ay ku taalo “Offices & Departments”; xageeda hoose ee ay ku taalo “Department Directory” kedibna waxaad gujisaa “Special Education Programs Division” kedibna waxaad gujisaa due process link. Sharciga dawlad-goboleedka iyo dawlada-dhexe wuxuu dhigeyaa in cid kasta oo gudbineysa dhageysiga dacwada ee nidaamka xuquuqda dhawrsan waa inay cida ay dacwadu ka dhexeyso nuqul qoraal codsi ah siisaa. Ogeysiinta cabashada waa inaad gacanta ka dhiibtaa ama aad boostada ku dirtaa ama faakis adiga oo ku hagaajineya labada xafiis ee ciwaankoodu hoos ku qoran yahay:

San Diego Unifies School District Due Process and Mediation Office 4100 Normal Street, Annex 7 San Diego, CA 92103 Telephone: (619) 725-7794 Fax: (619) 725-7424	iyo	Office of Adminstrative Hearings Special Education Division 2349 Gateway Oaks Drive, Suite 200 Sacramento, CA 95833-4231 Telephone: (916) 263-0880 Fax: (916) 263-0890

IDEA waxay wajib ka dhigeysaa in 30 maalmood xal lagu gaadho ka hor fursada dhageysiga dacwada ee nidaamka xuquuqda dhawrsan oo daacad ah ama aan eex lahayn. Marka la helo ogeysiinta cabashada, waxbarashadda degmadu waxay xareyn kartaa diidmo ku saabsan ogeysiinta cabashdaas iyada oo saldhig uga dhigeysa inaysan waafaqsaneyn warbixinada sharciga looga baahan yahay. Haddii diidmadaas la gudbiyo, Sarkaalka Dhageysiga Dacwadu waa inuu siiyaa go’aan ku filan ogeysiintaas muddo sahn maalmood gudahood ah, isla mar ahaantaasna, labada qolaba go’aanka ku wargeliyaa.

Muddo 10 maalmood gudahood ah marka la helo cabashada dhageysiga dacwada ee nidaamka xuquuqda dhawrsan, waxbarashadda degmadu waxay cabashadaas kaga soo jawaabi doontaa qoraal ahaan. Jawaabtaas waxaa ka mid ah, marka waxyaabaha kale laga reebo, sharaxaad ku saabsan sababata ay waxbarashadda degmadu u soo jeedisay ama u diiday inay talaabo ka qaado ogeysinta cabashadaas. Ka hor inta aan wax laga qaban ama nooca ay tahay nidaamka xuquuqda dhawrsan, kedib marka ay soo gaadho cabashada ogeysiinta ah muddo 15 maalmood gudahood ah, waa inay waxbarashadda degmadu qabato wakhti ay xal ku gaadho, haddii ay waalidiinta iyo waxbarashadda degmadu heshiis qoraal ah ku gaadhaan in shirka la iska dhaafo ama ay ku heshiiyaan in la adeegsado nidaamka dhexdhexaadinta ah. Wakhtiga xalka la gaadheyo waa inay goob jog ahaadaan ugu yaraan xubin ka tirsan IEP, wakiilka waxbarashadda degmada ee awooda u leh go’aan gaadhista iyo waalidiinta. Waxbarashadda degmadu ma keensaneyso qareen ilaa uu waalidku qareen keensado ama la yimaado. Haddii wakhtiga xal raadinta xal la gaadho, waxay laba cid ee ay dacwadu khuseyo qoreyaan qiraal sharciga waafaqsan oo arrintaas ku saabsan oo ay sharciga maxkamadu fulineyso. Laba qeybood ee ay dacwadu ka dhexeyso waxay heshiiskaas baabi’in karaan muddo saddex maalmaha la shaqeeyo gudahood ah laga soo bilaabo taariikhda qoraalka la saxiixay.

Haddii aan cabashadaas loo xallin si waalidku ku qanacsan yahay muddo 30 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda ay ogeysiinta cabashadaasu gaadhey waxbarashadda degmada waxaa la qabaneyaa dhageysiga dacwada ee nidaamka xuquuqda dhawrsan. Dhageysiga dacwadaas waxaa lagu qaban doonaa wakhtiga iyo goobta ugu habboon waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah iyo ilmahaba. Go’aanka oo qoraal ah waa in boostada loogu diraa dhammaan cidaha ay khuseyso oo dhan muddo 45 maalmood oo ay ku dhammaaneyso ama ugu dambeysa wakhtiga 30 maalmood ee xalka ah, haddii sarkaal dhageysaneya dacwadu uusan wakhtiga dheereynin codsi kaga

yimaada labada qeybood ay khuseyso mid ahaan. Go'aamada waxaa ku jiri doonaa sababaha loogu meeleeynayo dugsi kasta oo aan dugsiyada guud ahayn ama ha'ayadaha adeeg bixiya ama lacag siinta dugsi kasta oo lagu meeleeyo oo aan ahayn dugsiyada guud ama ha'ayadaha adeegyada bixiya. Sarkaalka dhageysta dacwadaha wuxuu tixgelin karaa codsiga ah in muddada dacwada la kordhiyo, kedib marka uu u arko inay sababo macquul ah jiraan. Muddo kasta oo la dheereeyo si wakhti loo siiyo maamulka go'aan ka gaadhista waa inay noqotaa wakhti le'eg muddada la kordhiyey oo keliya.

Waxaad xaq u leedahay shir dhexdaxaadin ah ah mar kasta oo ay nidaamka xuquuqda dhawrsan socoto, taas oo ay qareeno iyo abukaateyaal lacag la siineyo ka soo qeybgaleyaan. Ogeysiinta Cabashada ee la xidhiidha nidaamka xuquuqda dhawrsan waa la sixi karaa, haddii sixitaankaas ay waxbarashadda degmadu qoraal ahaan ku oggolaato, fursadna la siiyo sixitaanka ogeysiinta cabashada iyada oo la sii mareyo wakhtiga xalka, ama haddii sarkaalka dhageysanaya dacwada uu oggolaado in in ogeysiinta cabashada la saxo muddo aan ka yareyn shan maalmood inta aan dhageysiga dacwada la bilaabin.

Dhageysiga dacwadu waa mid kama dambeys ah, waana inay laba qolo ee ay khuseysa labaduba u hoggaansamaan. Labada qoloba waxay racfaan ama abiil go'aanka ah u gudbisan karaan maxkamada madaniga ah ee dawlad-goboleedka ama tan dawlada-dhexe muddo 90 maalmood gudahood ah, kedib markii go'aankaas la gaadhey.

Lacagta Qareenka
Talaabo kasta oo ku saabsan dhageysiga dacwada ee nidaamka xuquuqda dhawrsan, maxkamada, waxay ikhtiyaarkooda ku siin karaan lacagta qareen taas oo qeyb ka ah waalidka ilmaha naafada ha haysta, haddii aad tahay qofka dhageysiga dacwada ku sareeya. Lacagta qareenka oo macquul ah waxaa kale oo lagu bixin karaa kedib marka la gabagabeeyo maamulka dhageysiga dacwada oo ay heshiis ku yihiin laba qolo ee ay arrimuhu khuseeyaan. Lacagta la siiyo qareenka wax ayaa laga dhimi doonaa haddii mid ka mid ah arrimahan soo socda ay dhacaan: (1) Marka ay maxkamadu ogaato in si aan macquul ahayn aad u daahiso sidii khilaafkaas xal kama dambeys ah looga gaadhi lahaa; (2) marka lacagta qareenka saacadiiba la siineyo ay ka badato tan ay helaan qareemada kale ee jaaliyada ka dhex shaqeeya, kuwaas oo ay isku xirfad, magac iyo waayo-aragnimo leeyihiin; (3) Wakhtiga iyo adeegyada sharciyeed ee lagu bixiyeyba ay bataan ama dheeraad noqdaan; (4) Marka ay dhacdo inuu qareenkaagu waxabarshadda degmada u soo gudbin waayo warbixinada ay u baahan yihiin ee la xidhiidha cabashada nidaamka xuquuqda dhawrsan. Lacagta qareenka lama dhimi doono, haddii ay maxkamada ogaato in dawald-goboleedku ama waxbarashadda degmadu ay si aan macquul ahayn xalka kama dambeysta ah u soo daahiyeen ama qoddobka sharcigan lagu xad gudbay.

Lacagta qareenka ee ku saabsan shirar kasta oo kooxda IEP ay qabaneyso lama bixineyo, haddayna kooxda shirka ku kulmeysa ay sabab u ahayn dhageysiga dacwada ee nidaamka xuquuqda dhawrsan ama arrin sharciyeed. Lacagta qareenka waa loo diideyaa, haddii aad diido heshiis macquul ah oo ay waxbarashadda degmada ama ha'ayad dadweyne ay kuu fidiso toban maalmood ka hor inta aan dhageysiga dacwada la bilaabin, isla mar ahaantaasna, dhegeysiga dacwadu uusan kaaga wanaagsaneyn kan heshiiska lagu siiyey.

Dib-u-eegista lagu sameynaya Nidaamka Xuquuqda Dhawrsan ee Meeleynta Ilmaha ee aan weli Go'aan laga gaadhin
Ilmaha ku dhex jira nidaam dacawadeed oo maamul ama sharciyeed wuxuu ku sii jireyaa goobta waxbarashadda ee uu hada ku meeleysan yahay, haddii adiga iyo waxbarashadda degmadu aydaan ku heshiinin in meel kale lagu meeleeyo. Sida aan qeybtan hoose ku sheegnay, tanu waa marxalad gaar ah oo la xidhiidha akhlaaqda ilmaha. Haddii aad soo dalbanaysid oggolaansho bilow ah in dugsiga guud lagu oggolaado, ilmahaaga waxaa lagu qoreyaa barnaamijka dugsiga guud taas oo uu waalidku fasaxay ilaa dacwada socota ay dhammaato.

AKHLAAQDA DUGSIGA IYO NIDAAMYADA MEELEYNTA ARDEYDA NAAFADA AH
Ardeyda naafada ah dugsiga waa laga caydhineyaa ama waxaa lagu meeleynayaa goob kale oo beddelkeeda ah ama goob kale oo la mid ah oo ay ikhtiyaarkooda ku doorteen loona adeegsado carruurta naafada ah muddo toban maalmood ah. Haddii goobtaas lagu meeleyeey ay ilmaha kaga badato toban maalmood, waa in shir IEP ah la qabtaa si go'aan looga gaadho in ilmaha ay naafanimadu akhlaaq-xumada uu keentay iyo in kale. Shirka IEP waa in si dhakhso ah loo qabtaa, haddii ay macquul tahayna, ama muddo toban maalmood gudahood ah oo ay waxabarashadda degmadu go'aan kaga qaadaneyso akhlaaq-darida noocaas ah ee ilmihu ku kacay.
Waalid ahaan waxaa lagugu martiqaadeyaa inaad xubin ka noqotid kooxda IEP. Haddii kooxda IEP ay go'aan ku gaadhaan in dabeecad xumada uu ilmuhu la soo baxay ay sabab u tahay naafanimada ku timid, waxaa kooxda IEP looga baahan yahay inay dabeecadiisa baadhitaan ku sameeyaan, oo ay hirgeliyaan qorshe ay dabeecadiisa dhexgelis ku sameynayaan inta aysan wax dhicin oo uusan dabeecad xumo muujinin. Haddii uu ilmahaagu markii horeba ku

jirey qorshaha dhexgelka lagu sameynayey dabeecadiisa inta aysan wax dhicin, waa in kooxda IEP qorshaha dib u eegaan oo ay cusbooneysiiyaan, hadba sida loogu baahdo. Haddii kooxda IEP ay go'aansadaan in dabeecad-xumada aysan sabab u ahayn naafonimo ku timid, waa in waxbarashadda degmadu ay talaabo anshaxeed ka qaadaa, sida eris gebi ahaan muddo dheer dugsiga laga eryo (expulsion), taas oo la mid ah talaabada laga qaadi lahaa ilmaha aan naafada ahayn. Waxbarashadda degmadu waa inay ku siisaa qoraal ogeysiin ah talaabo loo baahnaa ee ay qaaday. Haddii aadan oggoleyn go'aanka kooxda IEP, waxaad Xafiiska Dhageysiga Dacwadaha ka codsan kartaa dhageysiga dacwada ee nidaamka xuquuqda dhawrsan.

Goob Kale oo Waxbarasho ah Si-ku-meel gaadh ah ugu Meeleyn (IAES)

Shaqaalaha dugsigu waxay ardeyga geyn karaan Goob Kale oo Waxbarasho ah Si-ku-meel gaadh ah ugu Meeleyn (IAES) in aan ka badneyn 45 maalmaha dugsiga la dhigto ah iyada oo aan la eegin in dabeecadaas ay keentay naafanimo ku timid. Marxaladaha uu ilumuhu hub sito, si kas ah u haysto ama u isticmaalo maandooriyaasha manuuca ah, iibiya walxaha maandooriyaasha manuuca ah, ama qof kale dhaawac halis ah u geysta inta uu dugsiga joogo, dhismeyaasha dugsiga dhexdiisa ah, ama dhacdo dugsiga lagu qabaneyo ayaa talaabo laga qaaday. Dugsigu waa inuu si dhakhso ah ula socodsiiyaa waalidka talaabada anshaxeed ee uu ilmaha ka qaadey. Mar ay arrimaha noocaas ah oo kale dhacaan kooxda IEP ayaa go'aan IAES ka gaadhi doonta. Haddii dabeecadahaasu aysan ku jirin hub, maandooriyaasha manuuca ah ama qof kale uusan dhaawac jidheed oo halis ah u geysanin, waxabarashadda degmadu waa inay codsataa dhegeysiga dacwada, haddii ay amminto in goobta uu hada ku meeleysan yahay ay sababi karto inuu ilmo ama qof kale dhaawac u geysto. Marka go'aan laga gaadheyo dhageysiga dacwadan oo kale waxaa sarkaalka dhegeysiga dacwadu uu ilmaha meeleeynayaa, kaas oo laga soo saarey ama laga soo beddelay IAES in aan ka badneyn 45 maalmaha dugsiga la dhigto ah.

Marka laga saaro goobta ardeyga uu ku jiro, waxabarashadda degmadu waa inay sii wadaa inay ilmaha u fidiso waxbarashadda guud ee ku habboon oo lacag la'aan ah. IAES, marka loo fasaxo, waa inay ilmaha u oggolaataa inuu sii wato ka qeybgalka manhajka guud, hubsato in adeegyadii uu heli jirey loo sii wado iyo in loo si faahfaahsan loogu sii hagaajiyo IEP.

CARRUURTA DHIGATA DUGSIYADA GAARKA AH

Marka ay waxbarashadda degmada iyo kooxda IEP ku taliyaan in meesha ugu habboon ee ardeyga lagu meeleynayo ay tahay waxbarashadda khaaska ah ee dugsiga gaarka ah, waxbarashadda degmada ayaa masuul ka ah inay bixiso dhammaan kharashkaas ardeyga ku baxaya. Hase ahaatee, waxbarashadda degmada khasab kuma ah inay u fidiso FAPE ilmaha ay waalikood ikhtiyaariyan ama si gooni ah uga diiwaangeliyeen dugsi gaar ah ama aan ahayn dugsiga guud. Marka ay arrimahaas oo kale dhacaan, waxay waxbarashadda degmadu soo jeedin kartaa Adeegyada Khaaska ah ee loogu talagalay Ardeyda Dugsiyada Gaarka ah dhigata.

Ku Meeleynta ay Waalidku ilmaha ku Meeleeyaan Dugsiga Gaarka ah

Haddii aad ilmahaaga ku meeleysid dugsi gaar ah ama aan ahayn dugsi guud iyada oo aadan waxabarashadda degmada fasaxa ka haysanin ama aysan maxkamadu kuu gudbin ama sarkaalka dhageysta dacwadaha, waxay waxbarashadda degmadu kharashka lacagtaas bixin kartaa oo keliya marka ilmahaaga la siineyo waxbarashadda khaaska ah iyo adeegyada la xidhiihda taas oo ay ha'ayadaha dadweynuhu xukumeyaan inta aan ilmha dugsiga gaarka ah laga diiwaangelin. Marka maxkamada ama sarkaalka dhageysta dacwadaha uu ogaado in waxbarashadda degmadu aysan FAPE siinin ilmahaaga wakhtigii loogu talagalay.

Ilmahaaga dhigta Dugsiga Gaarka ah Fiiro dheer u yeelasho

Haddii aad ilmahaaga ku meeleysid dugsiga gaarka ah, isla mar ahaantaasna, aad soo jeedisid meeleyntaas aad dugsiga gaarka ah ku meeleysay in lacagta dadweynaha lagu maalgeliyo, waa in waxbarashadda degmada fursad loo siiyaa ay fiiro dheer ugu yeelato meeleyntaa la soo jeediyey ee ilmahaaga loo soo jeediyey meeleyntaas. Waxbarashadda degmadu fiiro dheer uma yeelan karto ama baadhitaan kuma sameyn karto dugsiga gaarka ah iyada oo aan fasax laga haysanin ilmaha kale waalidkii ama qofka masuulka ka ah.

Marka lacagta kharashka ah ee dugsiga la siiyo la dhimayo ama la diidayo

Maxkamada iyo sarkaalka dhageysta dacwadaha ayaa dhimi kara ama diidi kara lacagta kharashka ah ee dugsiga la siiyo ah, haddii aadan ilmahaaga fursad u siinin inay waxbarashadda degmadu baadhitaan ku sameyso inta aan dugsiga guud laga kaxaynin. Waxaa kale oo lacagta kharashka dugsiga laguu diidi karaa haddii aadan wargelin waxbarashadda degmada in aadan u oggoleyn in ilmahaaga lagu meeleeyo waxbarashadda khaaska ah ee ay waxbarashadda degmadu soo jeedisay, oo

aadan ogeysiin bixinin ujeeddada aad ilmahaaga uga diiwaangelineysid dugsi gaar ah oo kharashka lacagta dadweynaha lagu bixineyo.

Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin in loo lacagta kharashka dugsiga la siiyo la xidhiidha meeleynta ardeyda ee dugsiga gaarka ah, marka ay maxkamada iyo sarkaalka dhageysta dacwadu ay go'aansadaan oo keliya inaan ha'yadaha dadweynuhu aysan ilmaha u fidin FAPE. Maxkamada iyo sarkaalka dhegeysta dacwaduhu kaama dhimi karaan ama kuma diidi karaan lacagta kharashka dugsiga la siiyo ah, sababahan soo socda dartood haddii aadan waxbarashadda degmada ogeysiin siinin; aqoon-daro darteed iyo aqoon la'aanta sida af Ingiriisiga loo qoro; in ilmaha ogeysiin la siiyo waxay sababeysaa dhaawac jidhka iyo mid shucuureed oo soo gaadha; dugsiga oo kaa hor istaaga inaad ogeysiin siisid; ama aadan helin nuqul ka mid ah Ogeysiinta Xuquuqda Waxbarashadda ama haddii kale lagugu wargeliyey shuruudaha ogeysiintan looga baahan yahay.

Ogeysiinta Waxbarashadda Degmada
Waa inaad waxbarashadda degmada ogeysiisa ujeeddada aad u rabtid inaad ilmahaaga dugsiga gaarka ah ku meeleysid:

- Shirkii IEP ee ugu dambeeyey ee aad ka qeybgasho inta aadan ilmahaaga ka saarin dugsiga guud ama
- Aad qoraal ahaan ugu gudbisid ugu yaraan muddo toban maalmaha la shaqeeyo ah (taas o ay ku jirto maalmaha feestooyinka ah) inta aadan ilmahaaga ka saarin dugsiga guud.

WARBIXINO DHEERAAD AH

Wixii warbixin dheeraad ah eek u saabsan xuquuqdaada iyo xuquuqda waxbarasho waxaad la xidhiidhaa:

San Diego Unified School District, Special Education Programs Division (619) 725-7700, ama
San Diego Unified School District, Office of the Special Education Ombudsperson (619) 725-8179

Si aad u heshid warbixino dheeraad ah ama in la idin dhexdhexaadiyo aad u gudbisid ama aad dhageysiga dacwada ee nidaamka xuquuqda dhawrsan waxaad la xidhiidhaa:

Office of Administrative Hearings Special Education Division 2349 Gateway Oaks Drive, Suite 200 Sacramento, CA 95833-4231 Telephone: (916) 263-0880 Fax: (916) 263-0890

Si aad u heshid warbixino dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqda waalidiinta ama dhibaatooyinka, taas oo ay ku jirto siyaabaha cabashada loo gudbiyo ama boostada loogu diro cabashooyinka ku xad-gudbista sharciga, waxaad isticmaashaa oo aad la xidhiidhaa ciwaanadan halkan hoose ku qoran:

California Department of Education Special Education Division Procedural Safeguards Referral Service (PSRS) Attention: PSRS Intake 1430 N Street, Second Floor, Suite 2401 Sacramento, CA 95814 Telephone: (800) 926-0648 Fax: (916) 217-3704

Cabshooyinka ku saabsan ku xadgudubka IDEA waxaad Boostada ugu diri kartaa ciwaankan hoos ku qoran:

California Department of Education Special Education Division Procedural Safeguards Referral Service 1430 N Street, Suite 2401 Sacramento, CA 92814 Attention: PSRS Intake

Tababarka Waalidka iyo Xarumaha Wararka oo ay maalgelisoIDEA:

Team of Advocates for Special Kids (TASK) 4550 Kearny Villa Rd., Suite 102 San Diego, CA 92123 Telephone: (858) 874-2386 FAX: (858) 874-0123

Cabashooyinka ku saabsan arrimaha IDEA aysan daboolin, waxaad kala tashataa Nidaamyada Cabashada Guud ee waxbarashadda degmada.